Taxanaha Tarjumada Af Soomaaliga ee buugga GUBAN

Qore: Cabdiladiif Cige

Tarjume: Boodhari Warsame

4

SHIRKII GARBACASTA

Sebtember 21, 2017

Odaygii waxa uu soo gaaray gurigii waynaa ee uu deggenaa ninkii ay tolka ahaayeen ee sarkaalka sare ee millitariga ahaa. Guriga waxaa dhooban askar dharcad ah. Odaygii ayay salaameen markii uu guriga u sii dhaafayay, maadaama ay u yiqiinneen nin guriga wax badan soo booqda taliyahoodana ay tol wadaagaan. Odaygii waxaa lagu duway ardaa yar oo loogu talagalay in ay ku sugaan dadka doonaya in ay la kulmaan sarkaalkan muhiimka ah. Halkaa ayaa shaah loogu geeyay intii uu sugayay. Muddo aan sidaa u dheerayn ka dib, waxaa isaguna ku soo biiray Cabdi oo macawis Soomaal ku xarragoonaya. Dabadeed, odaygii ayaa salaan ku bilaabay, ”war iska warran?” Cabdina waxa uu kaga jawaabay, “waa aan iska fiicanahay.” Odaygii ayaa sii waday, ”Ilaah mahaddi, gurigaygii waa lagu wada ladnaa. Laakiin gurigii Xoogsade, ganacsadihii ina’adeerkaa ahaa, musiibo deg deg ah ayaa maagtay. Xaaskii Xoogsade ee Tusmo ahayd ayaa mar uun saacad laga joogo ii timid oo ii soo sheegtay in Xoogasade iyo Abukar, ilma adeerteen, labadiiba gaari millitary lagu qaatay. Halka la geeyay, sababta iyo waxa dhibka jiraa uu yahay waa waxa i keenay ee aan kuugu imid in aan ku arko isla markii ay gabadhu iga tagtay.”



Sarkaalkii afkaa kala tegay oo arrinkii ayuu u qaadan waayay! Si qayaxan ayay taasi wajigiisa uga muuqatay. Waxa ay ku noqotay sidii tummaati ay haleeshay ama dharbaaxo meel jaan kaga timid ay ku dhacday. Waxaa ka soo hadhay uun ”Hmm!”, isaga oo xoogaa maskaxdiisu dawaaf ku dhaaftay odaygii hor fadhiyay. Dabadeed inta kursigii ka istaagay ayuu odaygii ku yiri, ”i sug, arrinkan anigaa ka salgaaraya e.” Dabadeed, qol kale ayuu tegay oo bilaabay in uu taleefan diro.

Copyright © 2017 WardheerNews, All rights reserved

”Qofka hadlayaa waa Taliye Bixiye. Iigu dhiib taleefanka taliyaha ugu sarreeya ee xerada haysta.”

”Haye!” ayaa ka yeedhay dhanka kale ee haatufka. Markii loo gudbiyay ayaa waxa uu maqlay taleefankii taliyaha sare oo dhowr mar dananay, dabadeedna waa laga qabtay.

”Waxa kula hadlayaa waa Taliyexigeenkii. Taliyihii sare xaruta ma joogo hadda.”

”Haa, Taliyexigeen. Waxa aan doonayay in aan ogaado cidda soo xirtay nin ganacsade ah galabta, sababta loo soo xiray, iyo halka ay geeyeen intaba. Yaa amarka lagu soo xiray baxshay? Isla saacad gudaheed ayaan doonayaa warbixin buuxda in ay gurigayga igu soo gaadho. Taliyexigeen, hadde waa ku sugayaa ee ogow!”

”Haye sarreeye, isla hadda ayaan ku dhaqaaqayaa hawshaa.”

Dabadeed, waxa uu ku soo laabtay odaygii oo halkii shaah iska fiiqsanaya, sida ka muuqatana ay wali ku taagantahay arrintii dareenka laheyd ee loo soo sheegay. Waa uu ag fariistay oo bilaabay in uu la sheekaysto odaygii. Odaygii ayaa dabadeed sidii ay u sheekaysanayeen hal mar ah la soo booday, ”xaggee hadda wax marayaan?” Xoogaa ayuu yara aammusay oo markaa u bilaabay in uu odayga uga warramo wixii hadda dhacay.

“Sida aad u yaabbantahay ayaan aniguna kaala mid ahay. Ma garanayo halka wax si ka yihiin. Millitarigu ma qabto shaqada booliiska loogu talagalay!”

“Haddaba, tabtaa ayay ahayd wixii galabta dhacay. Waxa aniga iga sii yaabshay waa waxa Maxamed loo abbaaray, dad fara badan-ne? Waxa aan maqlay in dad siyaasiin ah oo taliska hadda jira si qayaxan uga soo horjeestay inta la soo qabtay la laayay, laakiin bal muxuu galabsaday nin aan dhammaanteen u wada naqaan ganacsade Alle ka baqa oo miskiin aan sharciga jebin dambina lahayn ah?”

“Wax jawaabo ah hadda ka ma bixin karo su’aalahaa, laakiin bal aan xoogaa sugno. Waxa se aan hubaa in arrintani sabab leedahay.”

“Hadda maxaynnu yeelnaa?”

”Dee waxba, ilaa aan sida wax yihiin kala ogaanaynno!”

”Farax ii ma lahayn aniga markii aan maantadii hore arkay argagaxa ka muuqday wajiga xaaskiisa. Ii la ma ekayn arrin ku sal leh khaladaadka iska dhaca ee laga fisho askari wareersan iyo waxa la midka ah ee waa arrin waxaa oo dhan ka wayn, maxaa yeelay; waxa uu ahaa ganacsade magaaladan caan ka ah oo yar iyo wayn la wada yaqaan. Nin sidaa oo kale

Copyright © 2017 WardheerNews, All rights reserved

ahna askari derajo hoose ama amid sareba lehi sidaa sahlan isaga ma xiri karo, maxaa yeelay; Soomaal si wanaagsan ayay u yaqaannaan milgaha uu mudanyahay nin Xoogsade oo kale ah iyo waliba ninkaa oo kale waxa tol uu yahayba uu ugu fadhiyo.

Waxaa noo cad in ciddii falkan ku kacdayba ay si qumman uga war qabtay waxa ay kaga falcelin karaan ee kaga iman kara xigtadiisa madaxda sarsare ah. Waxaa taa dheer, saaxiibbadiis waxay ahaayeen dad la yaqaan oo manfac iyo mansabba leh. Waa arrimahaa kuwa murugada iyo yaabka igu hayaa."

"Aniga ruuxaygu waxyaalahaa aad ka sheegtay aad ayaan uga warqabaa, hase ahaatee dooni maayo in aan ku degdego aniga oo aan kala hubsan sida wax u jiraan. Been ayaan kuu sheegay haddii aan ku iraahdo ruuxaygu ka ma aragagixin warkan dareenka leh, waana run oo anigababa waa i gubaysaa in ina'adeerkay aniga oo aan dhiman dheeraynna xabsi la isaga taxaabo. Waxaa kale oo aan kugu raacsanahay in ciddii falkan ka dambaysayba ay anigana i maaggantahay. Si ay noqotaba se, bal aan dhawrno inta aan ka ogaanayno sida ay wax u dhaceen."

Halkaa marka ay xaajo marayso ayaa qof shaqaale ah oo dheeraynayaa yimid. Taleefan soo dhacay ayuu ugu yeeray.

"Halow Taliye Bixiye!"

"Haa, waa Taliye Bixiye qofka kula hadlayaa."

"Ninka shacabka ah ee magaciisu Maxamed Xaaji Xaashi yahay waxaa amarka lagu soo xiray baxshay taliye Cali Dheere oo ka socda qaybta ciidanka sirdoonka. Intaa ayaa war ku dhanyahay."

Warkii ayuu kula soo laabtay odaygii sugayay oo u sheegay halka amarku ka soo fulay, hase ahaatee warka uu hadda hayaa intaa ku dhanyahay.

"Hadda ayaan u socdaa in aan haleelo Cali Dheere oo waxan aan la qaadan karin ka salgaaro. Iska bax hadda oo gurigaagii ku laabo. Aniga ayaa cid kuu soo diraya adiga iyo odayada kaleba ee soo kaxaysa, haddii la idiin baahdo. Caawa waa in aynnu shir ballaaran yeelannaa."

Sidaa ayuu inta odaygii gawaaridii midkood ugu daray u yeertay kabtan kaaliyihiisa goobta ahaa, oo inta fooqa sare aaday labbiskiisii ciidanka oo buuxa isku boobbay. Waxa uu isku taagay iskujoog si wacan u feeraysan oo xiddig dhalaalaysa iyo kulleeti dhiin cas ahi ku astaysanyihiin, si ay cid walba ugu muuqdaan garaaddihiisa jananka iyo calaammada aan la garan waayin ee cududda kaga xardhan. Markii uu inta hoos u soo deggay uu barandadii bannaanka uga soo joogsaday ayay dhammaan askartii aqalkiisa joogtay wada joogsadeen oo mid walbaa digtooni bartiisa is ligay.

Copyright © 2017 WardheerNews, All rights reserved

Waardiyeyaashii barandada hor taagnaa inta banaatiikhdii shabbaax calaacalaha la dhaceen ayay iyagiina digtooni is wada liqdaareen. Gaari qafilan oo isna meel in yar u jirta hoganayay ayaa isla markiiba albaabka dambe janankii loo ballaqay, halkaa oo uu isagiina kursiga dambe sal muggi isku dhereriyay. Kabtankii ayaa dabdeed xagga kursiga hore soo fariistay, darawalkiina waxa uu daaha ka rogay calankii jananka ee ahaa casaan xiddig qur ahi ay dhexda kaga astaysantahay. Waxa sidaa oo kale oo uu daaha ka rogay taargooyinkii dambe ee iyagana bir xiddigi ku summadantahay ah. Waa sida uu ahaa baratakoolka millitarigu e, si loo muujiyo in gaadiidka janan taagtay oo aan hortiisa la mari karini uu saaranyahay.

Intii uu ku sii socday Xarunta Taliska Sare ayuu janankii sii qorshaystay wixii uu ka yeeli lahaa arrinta, isaga oo ka duulaya waxa ilaa hadda uu ka ogsoonyahay xaalka degdegga ah ee cakiran. Ninkani waa nin hore uga soo dhex dhalaalay saraakiisha da'da yar ee mabaadii'da Kacaanku si dhab ah ugu dheeryihiin, ayna ka go'antahay in ay u adeegaan habka Hantiwadaagga oo aad ugu dhow dhaqanka waxwadaagga xooladhaqatada. Hase ahaatee, iyada oo habka siyaasadeed uu beryahaa ka durkayay sinnaan iyo garsoor siman oo u sii liicayay keligiitalisnimo koox yari xukunkii, garaaddihii iyo sharcigiiba iyagu isku darsaday oo isa siisay, ka ma muuqan wax walwal ah oo uu ka qabay shaandhaynaha hoose ee ku saabsanaa beddelaadaha iyo dallacsiinta saraakiisha oo qaabdhismeedka guud ee ciidan lagu yiqiin ka baxsan, laga bilaabo drerajada dhexe ee Dhame (Kabtannada), Gaashaanle (Mijirrada) iyo Gaashaanle Sare (kornaylladda) ilaa Sareeye Guud (Janannada sarsare) kor loo gaaro. Waxaa kale oo socday beddelka saraakiil ruugcaddaa ahaa, laga bilaabo mijirro ilaa kornayllo, kuwaa oo si degdeg ah loogu magacaabayay jagooyin dublamaasiyadeed iyo kuwo kale oo iyaga oo da' jooga loo diray akadeemiyadaha ciidammada lagu tababaro ee Midowga Soofyeeti. Waxaa kale oo iyana jirtay tiro badan oo askar derejo hoose ah oo iyaga oo aan tababar qumman soo marin muddo yar gudaheed derejooyin sarsare loo dallacsiiyay, dabadeedna beddelay saraakiishaa hore. Dallacsiintaa ku ma ayan mutaysan wax aan aheyn in ay isku qolo yihiin Madaxwaynaha. Jananka markii hore si balaf ah ayuu uga warqabay beddelladaas, waxa se uu isaga qaatay arrin aan sidaa u sii buurnayd, marka loo eego geeddisocodka horumarka guud ee Soomaal.

Wax walba marka laga yimaado, cidina ma filato in geeljire aan waxbarasho qumman lahayni uu wax ka garto arrimaha *das capital* ee bah Afrikaan, isaga oo aan marka hore meel soo dhigan caadooyinkiisii geeljirenimo. Kooxda kacaanka cabsani waxay xataa ku faraxsanaayeen in ay isaga dulqaataan xadgudubyadaa foosha xun, arrintaa oo ay qayb ku lahayd u daacad noqoshada duqa "Aabbe Afwayne" ah. Taa waxaa dheeraa, Jananku waxa uun uu ahaa sarkaal booliis ah oo aan cabsi sidaa u wayn laga qabin. Waxa uu ahaa sarkaal ka haray xilligii Maxmiyadda gumaysiga Talyaaniga oo ilaa waagaa kor u soo dallacayay, dabadeedna Kacaanku si degdeg ah jagada ku siiyay, si ay u hantaan sarkaal lala heshiin karo oo wax u oggol. Kacaankuna, si uu bulshada magac ugu dhex yeesho, waa in uu adeegsadaa sarkaal da' ah oo a talada looga dambeeyo. Marka adkeynta iskuduubnida koox ahaaneed loo eego, jaallayaasha Kacaanka dhallintaa laga dhawraa!

Copyright © 2017 WardheerNews, All rights reserved

Waa ay iska ogaayeen in xulashada ninkani ay lid ku ahayd iskuduubnidooda dhallinyaranimo. Dhallinyaro waligood talakabood waa lagu yaqiin, taasina malaha waxay aheyd waxa ka hor istaagay in ay si caadi ah u fikiraan oo carqalad wayn iska indha tiraan. Hase ahaatee, si walba oo ay u indho adagtahay, xigmadi waa lagu yaqiin in ay talo dhallinyaro majaxaabiso.

Jananka talo ayaa ku ciirtay. Haddii uu meeshii yimid oo fiirshay, waxaa dhan walba ku gedaaman kuwo qabiilka cabsan oo aan waxar hoggaamin karin, iska daa dal ay hoggaanshaan e. Markan hadda la joogo, xataa kuwii Kacaanka lafdhabarta u ahaa waxaa jiitay kacdoonkan cusub ee habka hiillada tolka iyo xigaalada ku saleysan. Cutubyada ciidammada gaashaaman ah iyo hubkii oo dhan oo hal qabiilo gacanta u galay ayaa sababay in uu habkii misaanka awoodda qabiilladu si daran u dheelliyo. Taasi waxay ku khasabtay in qabiilooyinkii kale ay door bidaan in ay qoladan kibirtay ee tunku waynaaday barahooda bar ka tusaan. Sida ay ahaan jirtay, sababo keena ayaa jiray in duqeyda qabiilooyinka tirada badani joojiyaan dagaallada gembiska ah ee aan hal la is ka reebin, gaar ahaan marka colaaddu ku oogantahay qabiil ka tiro iyo tabar yar oo aan cudud ahaan ku aadin iyaga. Waa sidii caadada reerguuraagu ahayde, *qaniinyaa qaniinyo kaa fujisa*. Marka sidaa la isugu go'o ayaa duqayda qabiilooyinka kale ee waawayni soo kala dhex galaan, si ay gumaadka u joojiyaan, iyaga oo qoladii waynayd marna si caddaan ah colaad dhan looga soo wada jeesto ugu gooddinaya marna u soo jeedinaya in collaadda si qabow oo is afgarasho leh lagu dhammeeyo. Hase ahaatee, waa in ugu horreyn laga bilaabaa in colaadda hoosta laga hurinayo istaagtaa. Sidaa ayaa qabiilooyinka waawayn ee dagaal'ujoogga ah looga hor tegi jiray in ay colaadda islawaynidu hageyso kula dhex dhacaan birimageydada dumarka iyo carruurta ah ee uu galaaftay qabka gurracan ee macangagga ahi. Qabkaa baas ayaa dhala burbur lagu hoobto, maxaa yeelay; kii ina rag ahaa in magaca tolka ee ab ka ab laga dhaxlay wax la yeelo waxa uu ka xigaa in si xun loo hoobto. Magacaa ayey wax walba u huri jireen, guul iyo guuldarraba, ilaa ninka ugu dambeeya dhinaciisu dhul dhaco, canug yarba ha ahaadee. Tolku wax walba isagaa ka wayn, hase ahaatee halaagga waxaa joojin kara uun qabiilo ka baxsan oo tiro iyo taagba ka badan kuwa wax is biday, iyaga oo ugu gooddiya ay ku dhigayaan belo ka daran tii ay geysteen iyo in ay dhinac kala soo jeensayaan qolada tabarta yar ee la jabshay. Cagajuglayntaa ayaa cid walba oo madax adag caqliga ku soo celisa. Haddii si kale loo dhigo, xikmad kale meesha ma taal oo aan ahayn in loogu dhaarto in baladii ay dhigeen mid ka daran lagu markan doono haddii ayan colaadda xilka leh ee waallida ah degdeg u joojin. Sidaa ayaa xasilloonidii ku soo laabataa mar kale. Nabadayn ayaa ka dhex dhacda labadii is laayay, gabdho godobtir ah oo wixii aabbayaal iyo wiilal go'ay lagu illoobo ayaa la is dhaafsadaa, geel mag ahna waa la raaciyaa, si nabad buuxda loo sugo. Dhab ahaan, waxa qabiilooyinka is laayay gogosha nabadda soo wada fariisiyaa waa baqdinta ay ka qabaan in dhinac looga soo wada jeesto oo kuwo ka balo badani faraha saaran. Hubka fudud, qoryaha darandoorriga u dhaca, warmo, wiilal ka badan iyo fardokuwooda ka badan ayaa ahaa dheellitirka cududeed ee bulshada Soomaal.

Copyright © 2017 WardheerNews, All rights reserved

Markii Janankii soo gaaray Xaruntii Gaashaandhigga Qaranka ayaa mid ciidankii ilaalada ka ah qeylo dhagajebis ah salaan sharaf ku dhuftay. Waxaa weheliyay qoryihii oo inta isku mar la wada cabbaystay markan dhankii gaariga Jananka siday loo wada jeedshay. Wadihii ayaa aayar joojiyaha u duugay. Askari ilaalada ka mid ahaa ayaa gaarigii u soo dhowaaday oo si uu isu muujiyo inta salaan ciidan isla maqiiqay wadihii u foorarsaday, sidii uu waraysanayo. Ciidankii albaabka hayay ayuu dabadeed u qeylshay oo inta mar kale salaan isla qallajiyay Jananka magaciisii iyo darajadiisii ciidan af labadii ka yeershay. ”waa hagaag, ka fura iridda!” Ciidanka intiisii kalena sidiisa ayay salaan looxyo iskaga wada dhigeen. Gaarigii madaxda siday xaruntii gaashaandhigga ayuu hore uu sii galay, iyada oo iriddii uu gaaraba laga sii rogayo. Intaa amarkii waa la isu sii gudbinayaa, salaanta si safmar ah la is wada qallajinayaa, qoryahana shabbaax ku dhacaya sawaxan ayaa is qabsaday. Gaariga waa la iska yiqiine, askartu maamuuska dawaladeed ee ay u barteen uun ayay gudayayeen. Cidina xaruntan gudaha u ma dhaafi karto iyada oo aan askartu joojin oo hubsan gaadiidka.

Janankii gudaha ayuu dhismihii u sii galay, jaallayaasha kuwii uu ku kalsoonaana ballamo ayuu la dhigtay. Waa uu sii dhaafay oo aaday meeshii uu ku sugayay sarkaalkii baxshay amarkii Xoogsade lagu soo qabtay, waa kii uu degdegta ugu yeeray in uu xafiiskiisa ugu yimaado e. Gacanyarihii ayaa wuxuu u soo gudbiyay waxyaalo la xiriira shaqooyinkii caadiga ahaa, hase ahaatee Jananku waa ku gacan sayray. Waa si aan looga baran masuul sare oo lagu yiqiin in uu wanaag iyo isqaadqaad la’aan kula macaamili jiray dada ka hoos shaqeeya. Waxa uu door biday in wax looga sheego Cali Dheere.

“Maxaad ilaa hadda xog ka ururisay sarkaalkan aan u yeeray?”

“Mudane Janan, ilaa hadda xogta laga hayaa ma buurna. Xilligan hadda la joogo, waxaannu ka haynaa in uu Kornayl hoose yahay, Gobollada Dhexe uu ka soo jeedo, iyo in uu si dhakhso la yaab leh ah u dallacay, isaga oo beddelay sarkaal jaalki ahaa oo sida aad la socotaba hadda ah Ergayga Joogtada ah ee xagga militariga u fadhiya dalka Bulgaria.”

”Waan gartay. Hadda waqti ma noo haray?”

”Waa ina soo hayaa hadahan. Wax kale miyaa jira taliye Janan?” Jananki ayuu salaan u saaray.

”Kabtan, hadda ayaan warbixinta doonayaa, inta aanu inoo iman ka hor. In aan indhaha sii marsho uun ayaan rabaa.”

”Hagaag taliye!”

Janankii oo indhaha la raacraacya hawlihiisii caadiga ahaa ayaa taleefankii dhacay. Dhanka kale waxaa ku jira Gacanyarihiisii.

”Taliye Janan, Kornaylkii waa yimid waana u diyaar in uu kula kulmo.”

Copyright © 2017 WardheerNews, All rights reserved

”Soo daa haddaba.”

Iriddii ayaa la furay. Waxaa soo dhaafay nin dhallinyaro xayaysi dheer ah oo digtooni ciidan u istaagay. Janankii ayaa in uu fariisto ugu gacan haadiyay. Mid ka mid ah kuraastii kashkaashka haraggu ku dahaaranyahay aheyd ayuu salka dhigay, isaga oo xafiiskii oo dhan kor iyo hoos daymo ku ekaynaya. Waxaa u muuqday taleefan caddaan iyo madow ah iyo calammo ay calaamadaha dalka iyo ciidammadu ku astaysanyihiin. Intaa marka laga yimaado, miis weyn oo dhosoqa adag ah ayaa gadaashiisa waxaa fadhiya Jananka. Jananku waxa uu sarkaalka martida ah ugu muuqday nin da’dii afartameeyada ku jira, cirro teelteel ah leh, muraayadaha indhaha gashan, una muuqada inuu eegamada meel isaga dhaafsiisan ku dhaygagsanyahay. Jananku si dhab ah ayuu ninkan dhallinyarada ah ee u so galay ugu maqnaa.

”Kornayl, maxaa militariga ka galay in uu guryaha gaarka loo leeyahay galo oo shacabka soo xirxiro?”

”Mudane, waxaannu raacnay warbixin Sirdoonka Qaranku baxshay. Sida aad adiguba la socoto, waxaannu haynnaa xog sheegaysa in ganacsadaha ay arrintani ku saabsantahay uu u kala dab qaadi jiray qorshe ballaaran oo ganacsi hub la xiriira. Waxa kale oo uu ka mid yahay koox mucaarad ah oo ay ka go’antahay in ay Kacaanka afgembiyaan. Mudane Janan, saacado yar dabadood ayaan warbixinta oo buuxda u sii gudbin doona Taliska Sare, hase ahaatee warbixnta hordhaca ah oo buuxda saacad dabadeed ayay xafiiskaaga soo gaari doontaa. Warka nuxurkiisu aan ku siyo e, waxaa keentay in militarigu si bareer ah faraha ula soo galo arrintan shacabku waa nabadgelyada qaranka.”

”Waa kee sarkaalka qaabbilsan arrintani?”

”Waa Jananka la yiraahdo Kaddaroo-dibidhal.”

Intaa markii ay is yiraahdeen ayuu Janankii fasaxay sarkaalkii. Qaynuunku markan waa in uu kor u sii baaro arrinta oo ula tago Jananka la sheegay. Cali wax yar ayuu digtoonow is ligay oo dabadeed ka sii huleelay xafiiskii Jananka. Gacanyarihii Jananka oo warbixintii sida ayaa iridda ka sii sagootiyay. Gacanyarihii ayaa la soo galay warbixintii uu gacanta ku siday, isaga oo sida shaqadiisu aheyd, marka hore isha soo marshay, dabadeedna Jananka hortiisa dhigay. Jananku si fiican ayuu warbixintii uga bogtay. Waxaa ku yiil Xoogsade iyo ganacsade kale oo ay isku meel ka soo wada jeedaan dambigana la maleegay. Labadoodaba waxaa lagu eedeeyay in ay xagga maalgelinta ku taageereen koox dib-usocod gadoodsan ah. Warbixintu waxay xataa qortay in uu arrinta faraha kula jiro dal deris ahi, taa oo khayaano qaran tan ugu sarraysa ah, haddii lagu helana Xoogsade uu maxkamad milateri horteeda dil toogasho ah ku mudan karo. Jananka waxaa xaadda dhaqaajiyay warbixinta xooggan ee sida la yaabka leh la isugu duway. Xoogsadaha uu warbixinta ka akhriyay waaba mid aad uga duwan kii uu waligii yiqiin!

Copyright © 2017 WardheerNews, All rights reserved

Qacdii hore waxay u muuqatay in caddayn marag-ma-doonto ah lagu hayo in uu Xoogsade ku lug lahaa dambiyada *kacaandiidka* ah. Jananku gacanyarihiisii ayuu wayddiiyay waxa uga baxay warbixinta.

“Warbixintu aad ayay u xeel dheertahay, waxaana la doonayaa in si fiican loogu kuurgalo. Hase ahaatee, inta yar ee aan ka fahmay waxaa ka muuqda koox yar oo caddeyn sugan lagu hayo, in kasta oo aanay u ekayn kuwo ay ka suurowdo waxaasi. Isu wada gee oo, waxay aad ugu dhowdahay in ay yihiin koox dambi isu kaashatay tii ugu fogeyd ee waligay i soo marta. Haddana, aan kuugu ceshee, waa dacwad la marsiin karo qofka aan kala aqoon waxyaalahan.”

“Janan Qumane ii wac hadda!”

Markii Gacanyarihii Goobtu xafiiskii wax yar ka sii maqnaa ayuu taleefankii soo dhacay.

“Ma Janan Qummanaa? Waxa hadlayaa waa Janan Bixiye. Qoyskii ka warran?”

“Aad ayaa loo ladanyahay Qummane. Waa maxay warbixintani? Oo muxuu militarigu dadkan aanay ka suuroobin ugu soo oogay dambiga basaasnimada?

“Haa Bixiye. Arrin silloon ayay u muuqan kartaa marka hore, hase ahaatee caddaymo aan markhaati doonin ayaa laga hayaa. Waxaana u sii dheer wixii lagu yiqiin ee hore looga hayay raggaa. Saaxiib basaasnimadu, sida aad u jeeddo, meelo aan laga filanayn ayay maraysaa oo aad uga duwan sidii aan ku niqiin. Waxaan jeclaan lahaa in aannu kulanno, si aan kuugu sharraxo caddaymaha sugan ee aan ka haynno kooxdan. Waa la socdaa Xoogsade in aad xigto dhow tihiin, waddani toosanna aad u taqaanno. Gurigaygii ayaan mar dhow aadi doonaaye waxaan rajaynayay in aad halkaa iigu timaado oo aan ka wada hadalno arrinta. Fadlan warbixinta hordhaca ah bal sii akhri, gurigana waan kugu sugayaa.”

“Waa hagaag. Waa ka baxayaa shaqada mar dhow. Saacad dabadeed waa ku la joogaa.”

Intaa ka dib, Janankii warbixintii hordhaca ahayd ee Cali Dheere ayuu isha mariyay, dabadeedna wuxuu u yeeray Gacanyarihiisii Goobta.

“Waxaan kaa doonayaa in aad warbixintan baaritaan dabagal ah ku samayso caawa, wixii kaaga soo baxana miiska xafiiskayga ayaan ka filayaa berri subax. Waa ka warqabaa in warbixinta oo buuxdaa aanay wali soo bixin. Haddaba, waxa aad hayso uun wax ka soo diyaari. Kornaylku wuxuu sheegay in la hayo caddayn sugan oo ku saabsan in meesha gacan shisheeye ku labantahay iyo waliba dheeraad! Waxaa kale oo aad diyaarisaa ciidankii ii gelbin lahaa guriga Janan Qummane.”

Janankii gurigii Qummane ayuu isa sii taagay, iyada oo salaamihii ciidanka ee la isla wada qallajinayay siday ahaan jirtay lagaga warayo tallaabo walba. Waxaa loo sii gudbiyay qol fadhi aad u ballaaran ah oo guriga ka yara go’an, hase ahaatee ay hooso ku taxani xiriiriso.

Copyright © 2017 WardheerNews, All rights reserved

Markan waxaa soo dhoweyntiisa qaabbilay Gacanyarihii Goobta ee Janan Qummane oo isagu markiiba hore u soo yara tallaabo boobsiiyay. Iriddii ayuu furay, isaga oo ku dhawaaqaya "Taliye, waa Janan Bixiye!" Bixiye waxa u muuqday Qummane oo ag taagan daaqadad weyn, meel ka dambaysa miis xardhan oo ballaaran iyo kursi kashkaash qurxoon leh. Qummane markii Jananku soo galay ayuu inta xaggii iridda u soo jeestay dhoollacaddeeyay, isaga oo jirkiisa oo dhan ka muujinaya raynraynta inuu qaabbilo Janan jaalki ah. Qofnimada Qummane ee bulshaawiga ah, cod waynida, laf dheerida iyo midabkiisa madowga dhalaaya ah ayaa Jananka martida ah cajabiyay markii uu salaamay.

"Soo dhawow, soo dhawow Bixiye! Sidee tahay saaxiibkayga qaaliga ahow? Mar hore ayaa noogu dambaysay in aan wada yeelanno kulan dheer oo aan ahayn shanta daqiiqo iyo waxa la mid ahe u dhexeeya kulammada kala duwan ee aan ka yeelanno shaqada dawliga ah."

"Waa aan ladanahay, wax walbaana waa hagaag. Waa ay wanaagsanaan lahayd haddii aan heli lahayn waqti badan oo aan ku kulanno, sidii aan yeeli jirnay waagii aan akadeemiyada tabarka ciidanka dalka dibaddiisa ugu maqnayn."

"Tabtaa ayaan aniguna dareemayaa. Dhallinyaradani badankoodu waxay ku mashquulsanyihiin hawlahooda gaar, intii ay horumarka Kacaanka ka shaqayn lahaayeen. Waxay ila tahay in aan yar iyo waynba barno waxa dantooda dhabta ahi ugu jirto."

"Haa, haa e. Wax badan ayaa u baahan in wixii hore aan wax iska wayddiino. Waa caqabad wayn oo nagu gudban."

"Waa ogahay. Sidee loo sharraxi karaa hab dawladeed? In waxa dal isku hayaa ay tahay danta dawladeed ee aanay ahayn danta qabiil."

"Wax badan ayaan aniguba ka fakaray isla arrintaa, ilaa haddana jawaab u ma hayo."

"Wax la cabbo aan kuu dhiibo."

"Haa, mahadsanid."

Qummane sixiimad ballaaran oo miiska saarnayn ayuu u dhaqaaqay. Xoogaa Vodka ah ayuu Sprite ku barxay oo Bixiye u dhiibay, halka isagu Rum ka shubtay. Dabadeed labadoodiiba kursigii raaxada badnaa ayay wada fariisteen. Qolkan ballaaran waxaa loo qurxiyay si aan ka badbadis aheyn hase ahaatee laga helo. Waxay hadda bilaabeen in ay dib u xusuustaan waayihii ay ku jireen dugsigii tababarka military ee dibadda loogu diray. Labdooduba waxay ka soo baxeen kulliyadda Royal Sandhrust Academy oo ay laba dufcadood oo isa soo garay hase ahaatee kala horreeya ka ahaayeen. Ku dhowaad laba sano ayaa u dhexaysay. Bixiye sanadkiisii ugu dambeeyay ayuu ku jiray markii Qummane kiisii ugu horreeyay ahaa. Sidaa ayuu Bixiye kaligii ku ahaa ilaa laba sano oo aanu wehelin arday kale oo dalkiisa ka socda. Markii uu soo galay kulliyadda ciidanka, Qummane wuxuu Bixiye u aqoonsaday nin dhallinyaro ah oo lala macaamili karo. Dhab ahaan, Qummane ayaa markii hore soo raadshay.

Taxanaha Tarjumada Af Soomaaliga ee buugga GUBAN
Qore: Cabdiladiif Cige
Tarjume: Boodhari Warsame
Copyright © 2017 WardheerNews, All rights reserved

Labadu waxay noqdeen saaxiibbo isku dheer oo ka dhex muuqda ardada ka kala timid dalalka fog fog ee mar dhow xornimada qaadan doona. Ardadii badnayd si wanaagsan ayaa la isu bartay, in ay waxyaalo badan ka dhexeeyaan ayay ogaadeen, saaxiibtinnimo aan go'in ayay dhigteen, markii ay dalalkoodii kala duwanaa ku soo kala laabteenna waxay la xirteen in yar oo awood badan oo ay isku dan ahaayeen. Waxaa loo qaybshay in ay bartaan taariikhaha dagaalladii reer Yurub ee la wada yaqaan, iyaga oo aan badanaa waxba looga sheegin sida dunida kale uga dayacnayd in ay cayaarahaa dagaal ka qayb qaadato. Dhac iyo boob qayaxan ayaa waxaa lagu sheegay ilbaxnimo, diin iyo waxyaalo kale oo wanwanaagsan. Aradadaa shisheeye waa lagu qulaamiyay si ay mar walba uga dhaadhacdo in walaalahooda kale ay aad uga sarreeyaan. Hadda waxaa ka dhaadhacsan oo ay qaayibeen in haddii aanay cilmigan ku hanuuni lahayn ay ku abaadi lahaayeen waayihii hore ee fadhiidka ahaa ee dunida ilbaxday ka soo gudubtay.

Intii aanu Bixiye iman, Qummane waxa uu ka war hayay koox ka mid ahayd dufcaddkii Afrikaanka ahayd ee London oo ka kala tirsan xisbiyada Shaqaalahaha iyo, si sir ah, xisbiga Hantiwadaagga. Waxa uu gaar ahaan saaxiib ula ahaa arday filosofiyada baran jiray. Waxa uu ka soo jeeday carriga West Indies, waxana uu ku dhaadan jiray in la burbursho awoodda ay reer Galbeedku ku haystaan dhammaan dadwayga reer Bariga. In kasta oo ninkan dabeecaddiisu guud ahaan wanaagsanayd, haddana marka uu afka kala qaado waa laga durkaa gurxanka aad awooddiisa hirka badda mooddo ee ku qarsoon codkiisa caadi ahaan yar marka kor laga arko. Dunidan iyo waxa ku nool oo dhan ayuu xil iska saaray ninkani. Waxaa mar walba afkiisa ka qoyanaa jallaadyadii reer Galbeedka ee Hegel, Marx iyo qammaammuurtii kaleba ay ku dhanyihiin. Saaxiibtinnimadaa iyo kuwo la mid ah ayuu Jananku hurdo la ladi waayay. Intaa waxa uu akhrin jiray buugag badan oo ka baxsan casharrada militariga. Halkaa ayuu kala yimid cilmiga uu dunida ku cabbiro, siiba dalkiisa iyo sida uu isagu isaga dhex arko. Halkaa ayay ahayd meesha u bidhaamisay dunida iyo ka fekerkeeda aan dhammaadka lahayn. Sidaa ayuu Qummane kabiir ugu noqday Bixiye markii uu kulliyadda soo galay, xagga cilmiga millitariga iyo kan caalamka kale ku saabsan ee uu ka bartay ardadii Afrikaanka ahayd ee dunida inteeda kale ka kala timid.

Cirka waxaa ku jiray kicin is beddel doon ah, dhaqadhaqaaq, dhiidhi iyo kacaan guud oo dhasha. Halkii uu Bixiye la yimid fikir meel yar uun ku xeernaa ayuu wuxuu soo dhex galay duni dhan oo fikirkiisa ballaarisa isaguna uu iska dhex arko. Labadooda Bixiye ayaa Soomaaliya ku soo hor laabtay. Wuxuu u soo laabtay dal tallaabo geesinnimo leh ku dhaqaaqay, ka dib markii labadii gobol ee gumaystayaasha Talyaaniga iyo Ingiriisku kala haysteen la mideeyay. Hase ahaatee, halkaa laga ma sii qaadin. Qayladhaantii midnmada iyo isbahaysiga Afrika ayaa horboodayaashii oo dalka xagga horusocodka u hagaya wada madaxmaray. Hase yeeshee, waxa baladu ka dhacday ee la kari waayay waxa uu ahaa sidii la isu oggolaysiin lahaa ee ay isu la jaanqaadi lahaayeen qaabkii hore iyo kii dambe e dawladnimo. Halkaa waxaa si xil leh madaxa isu daray qaabkii qabiilka ee ismahadiyay iyo fikradahii Afrikaanka horusocodka ah. Labadaasi waxay noqdeen isqaadiwaa iyo kaaf-iyo-

Copyright © 2017 WardheerNews, All rights reserved

kala dheeri. Dunidii ballaarnayd oo udbaheedii iyo dhigaheedii waadata ayaa waxaa laga dhex curiyay tii aadka ciriiriga u ahayd ee danaha qabiil iyo dareenka tolka meel dhaafsiisan aan wax ka arki karin. Sidaa ayay ahayd Soomaalidii Janannada iyo saraakiisha ka hoosaysaa u guntatay in ay wax ka beddesho oo xagga horuscodka togan u hagto. Har iyo habeenba Bixiye waxaa ka go'nayd dhalashada Jamhuuriayad Hantiwadaaga Soomaaliyeed.

Ilaa iyo hadda Bixiye u ma cadda sababta xariggan keentay. Ilaa hadda waxaa uun la tusay warbixinta nin geed dheer iyo mid gaabanba u fuulay in uu rag kale dambi culus la maleego. Wuxuu dhab ahaan uga fekeray in dawladda ay dani ugu jirto in ay wixii xiriir dibadadeed sheegtaba jaajuusnimo iyo khayaano qaran u aragto! Intaa dabdeed, wuxuu nabadgelyeeyay Janankii oo ballanqaaday in ay ka go'antahay ka miradhalinta yoolasha horusocodka ah ee la higsnayo.

La soco Cutubka 5-naad.

Boodahri Warsame
Email:Bodhari.warsame@gmail.com

Halkan ka kahriso:

Guban:Taxanaha tarjumada buugga GUBAN- Cutubka 1aad- Dhaamiso

Guban:Taxanaha tarjumada buugga GUBAN- Cutubka 2 aad- Xabsi

Guban:Taxanaha tarjumada buugga GUBAN- Cutubka 3aad- Tolka

Boodhari waa qoraa tarjumay ama gacanta ku haya buuggaag badan oo qiimo taariikheed ku leh Soomaaliya. Waxa uuna si joogto ah qoraaladiisa ugu soo ban dhigaa degelka WardheerNews.

Copyright © 2017 WardheerNews, All rights reserved